TEATTERI-KORKEAKOULU
TAIDEYLIOPISTO

# WARGELIN IYO OGEYSIIN KU SAABSAN KA QEYBGALAYAASHA CILMI BAARISTA

Ilmahaaga waxaa lagu casuumay in aay ka soo qeybgalaan cilmi baarista barashada qoob ka ciyaarka. Wargelin macluumaadka kan, waxaa cilmi baarista lagu sheegayaa ka baaraandegidda macluumaadka shaqsiyadeed. Intaa waxaa ka dheeraad ah cilmi baarista taswiir cabbireysa, taa oo uu cilmi baaraha u sahleysa in uu u sheego ilmaha ka qeybgalka cilmi baarista.

**Magaca cilmi baarista:** Ciyaarta qoob ka ciyaarka! Caruurta, dhaqdhaqaaq iyo ciyaar – U kulmidda cilmiga farshaxanka barashada qoob ka ciyaarka.

**Cilmi baaraha cilmi baarista sameeyay:** Xannaanada XXXXXX dhexdeeda cilmi baarista farshaxanka waa qeyb ka mid ah barashada qoob ka ciyaarka, masterka farshaxanka Tuire Colliander qormooyinkeeda cilmi baarista, oo aay ka qoreeyso jaamacadda Artiska, akadeemiyada masraxa faraca cilmi baarista. Tuire waxeey ka soo shaqeeysay xagga arrimaha caruurta barashada qoob ka ciyaarka, caruurta aay da'doodu kala duwan tahay, laga soo billaabo sannadkii 2001.

**Mowluuca cilmi baarista:** Ujeedadu waa in la baaraa, sida dhaqdhaqaaqa curineed iyo qoob ka ciyaarka sida aay isu kaabi karaan xagga xanaanada ku barbaarinta farshaxanka. Cilmi baarista waxaa lagu goobayaa hab dhaqannada, halka dadka waaweyn iyo carruurta aay uga wada shaqeyn karaan, uguna faaiideyn karaan, ayagoo xuduudaha luqadda ka gudbaya. Ujeedadu waa soo saarka fikirka carruurta, ayadoo lagu qiimeeynayo caruurta, laguna adkeynayo hab dhaqan shaqeedka iyo farshaxanka qoob ka ciyaarka helitaankiisa sidii kor loogu qaadi lahaa xilliga waxbarashada barbaarinta hore ee carruurta. Cilmi baarista waxeey ku jiheeysan tahay barbaarinta hore iyo waxbarashada qoob ka ciyaarka sidii loo hormarin lahaa ayadoo la tixgalinayo danta carruurta.

**Cilmi baarista iyo jadwal waqtiyeedka:** Howsha xannaada XXXXXX waxeey billaaban Deyrta 2019 waxuuna dhammaan doonaa bisha Maay 2020. Waqtigaa inta lagu guda jiro, cilmi baaraha waxuu goobjoog aay ku ahaan doontaa xannaanada caruurta wiiggiiba afar maalmood. Hab raaca dhammaadkiisu april 2020, waxaa lagu qaban doonaa xannaada carruurta dhexdeeda bandhigyo, halkaas oo lagu soo saari maxsuulka howsha. Arrintaa waxaa lagu wargelin doonaa ka qeyb galayaasha xilliga dhaw.

**Iskaa wax u qabsasho:** Ka qeybgalka cilmi baarista qasab maahan. Carruurtaada weey joojin karaan ka qeybgalka cilmi baarista waqti walba uu doono. Haddii ilmahaaga uu ka baxo cilmi baarista, wax caqabad ah ama dhibaato ah oo loo geysan doono ma jirto.

**Aalado aruurin:** Cilmi baaraha waxuu aruurinayaa ayadoo la diiwaangelinayo aaladaha ku muujin farsamo shaqeed qood ka ciyaarka si sawirro ah, video iyo cod duubis leh, sidoo kalena si qoraal ah (Cilmibaaraha qormooyinkiisa xasuusta ah iyo carruurta aaladaha qoraal ee aay soo saaraan, sida sawirrada). Sidoo kale carruurta waxeey ka qeybgali karaan isa sawirista. Gabagabada cilmi baarista bandhigga waa la duubi doonaa oo si tayo sare lehna waa loo qaabeyn doonaa oo la iskugu dubaridi doonaa, kuwaas oo qeyb ka mid ah lagu soo daabici doono qoraalka cilmi baarista buugga gundhigga qalin jabinta. Waxaa muhiim ah, in farshaxanka qoob ka ciyaarka oo si maqal iyo muuqaal ah loo keydiyo (Taswiirro iyo vidiyowyo), si markaasi uu cilmi baaraha uu dib ugu soo ceshado dhacdadii, dhaqdhaqaaqii, habkii iyo sidii aay wax udhaceen ayadoo sheedda laga eegayo.

**Lafagurka macluumaad shaqsiyadeedyada iyo xaquuqda ka qeybgalayaasha:** Macluumaad shaqsiyadeedyada (tus. ahaan sawirrada, vidiyowyada iyo codad duubista intuba waxaa laga yaabaa in aay dhex taallo macluumaadka shaqsiyadeedyada) lafagurka waxaa aasaas u ah oggolaanshaha baarista iyo macluumaad qaabeynta qodobka 6aad bartiisa 1a: "diiwaangelinta waxaa lagu siiyay oggolaanshaha macluumaad shasiyadeedka si loogu lafo guro hal mid ama asbaaba kale oo gaar ah awgood". Lafagurka macluumaad shaqsiyadeedyada, kuwaa waxaa loo isticmaalaa oo kaliya cilmi baarista (soo bandhigga cilmi baarista, seminaarada iyo bandhigyada shirarka, waxbarashada, internetka howlaha qalinjebinta), waana mid aad loogu kalsoonaan karo oo kaliya cilmi baaraha

aaladahaas la soo uruuriyay uu kaligii uu u geli karo. Macluumaad shaqsiyadeedka sida caadiga ah loomaba gacangeliyo dadyow kale, sidoo kalena looma gacangeliyo waddanka Finland meel ka baxsan. Macluumaad shaqsiyadeedka gudbintiisu waxeey ku saleeysan tahay sida uu qabo sharciga xafidista arrimaha gaarka. Ka qeybgalayaasha cilmi baarista waxeey leeyihiin tusaale ahaan wargelin xeyndaab sharciyadeedyo, taas oo ulajeedada aan laga weecin karin sida: xaquuq lagu galo macluumaadka, laguna lafaguro, xaquuq lagu hago macluumaadka, xaquuq lagu diido lafagurka macluumaadka shaqsiyaadka iyo xaquuq lagu baabi'yo macluumaadka. Aaladaha cilmi baarista loo adeegsado waxaa la baabi'in cilmi baarista qalin jabinta marka aay soo idlaato.

**Cilmi baarista warbixinteeda dheeraadka ah iyo isticmaalka xaquuqooyinka:**
Cilmi baarista tan waxaa diiwaan gelinaya qofka masuuliyadda cilmi baarista leh oo ah Tuire Colliander iyo Jaamacadda Artiska. Warbinta dheeraadka ah ee la xiriirta arrimahaasi waxaa bixinaya Tuire Colliander xanaanada carruurta ama email-ka: tuire.colliander@uniarts.fi.
Warbixinta dheeraadka ah ee la xiriirta lafagurka shaqsiyaadka iyo isticmaalka xaquuqaha qolyaha la cilmi baarayo intuba waxaa bixinaya sidoo kale Jaamacadda Artiska u qaabilsanaha qarinta macluumaadka Antti Orava (tel. 029 447 3568, email: tietosuoja@uniarts.fi).
Haddii loo baahdo cabashooyinka arrimaha la xiriira waxaa loo gugbin karaa u qaabilsanaha qarinta macluumaadka (emaili: tietosuoja@om.fi). Ka akhri in dheeraad ah internetistä: http://www.tietosuoja.fi.

iyo macluumaad qaabeynta qodobka 6aad bartiisa 1a: ”diiwaangelinta waxaa lagu siiyay oggolaanshaha macluumaad shasiyadeedka si loogu lafo guro hal mid ama asbaaba kale oo gaar ah awgood”.